# BreastScreen WA

Somali  Soomaali

## Macluumaadka baarista naaska – waxaa lagu helli karaa luqada kale



### Kansarka naaska- xaqiiqada

Kansarka naasku waa kansarka ugu helista badan dumarka Australia lagamana hortegi karo.

**Khatarta ugu weyn oo ah in uu samaysmo kansarka naaska waa inaad tahay dumar aadna qof sii weynaanaya tahay.**

Kansarka naasku waa kooxo unugyo ah oo aan caadi ahayn kuwaas oo sii weynaada siina bata. Ugu damaynta unugyadaasi waxaa laga yaabaa inay noqdaan buruqyo. Haddii kansarka aan la saarin ama la xakamayn unugyada kansarka ayaa ku fidi kara qaybaha kale ee jirka wuxuuna sababi karaa dhimasho. Helida kansarka naaska waqti hore wuxuu wanaajiyaa fursada loogu dawayn karo si guul leh.

### Yaa lagu samayn karaa baarista raajada naaska?

BaaristaNaaska ee WA ayaa bixisa baaritaan **LACAG-LA'AANA** oo ah raajada naaska dumarka jira 40 sanadood ama ka weyn oo aan lahayn astaamaha naaska. BaaristaNaaska WA (BreastScreen WA) wuxuu ku dhiirgeliyaa dumarka jira **50 ilaa 74** sanadood inay sameeyaan baaritaan **LACAG-LA'AANA** oo raajada naaska **labadii sanaba** hal mar.


**In ka badan 75% kansarka naaska waxaa laga hellaa dumarka jira 50 sanadood ama ka weyn.**

NaasBaarida WA wuxuu ixtiraamaa barayfasiga dumarka iyo sharaftooda. Waa adiga go'aankaaga in lagaa qaado raajada naaska. Samaynta go'aankaan waxaa laga yaabaa inaad kala hadasho arrinta dhakhtarkaaga.

### Waa maxay raajada naasku?

Raajada naasku waa X-ray, ama sawir, gudaha naasaha dumarka. Raajada naasku waa habka ugu fiican oo lagu ogaan karo kansarka waqti hore.

Raajada naaska waxaa laga yaabaa in lagu ogaado kansarka naaska ama dhakhtarkaaga ayaa dareemi kara.



### Sidee loo sameeyaa raajada naaska?

Naaska ayaa si taxadaran loogu aadiyaa mishiinka X-ray-ga waana lagu riixaa dhowr ilmiriqsi iyada oo x-ray-ga la qaadayo.Labo X-rays ayaa laga qaadaa naas kasta, mid korka ah iyo mid dhinac ah.

Cadaadiska naasku waa muhiim si sawirka ugu muuqaal fiican loo qaado loona isticmaalo inta ugu yar oo shucaac falaareed ah. (arag muuqaalka hoose).

Cadaadisku waa laga yaabaa in uu adag yahay oo aanu lahayn debecsanaan laakiin wuxuu qaataa dhowr ilmiriqsi. Waxaad weydiisan kartaa qofka in uu joojiyo mar kasta.




### Maxaa dhacaya markaan booqdo NaasBaarista WA si aan u hello raajada baarista ee LACAG LA'AANA ah?

Dhamaan shaqaalaha NaasBaaridu waa dumar NaasBaarida WA xarumeheeda.

Marka lagugu sameeyo raajada naaska, gasho laba maro, sida goono ama surweel iyo shaati.

Ha isticmaalin talcum powder ama waxaad isku udgisey maalinta ballanta.

Markaad timaado NaasBaarida WA:

- Waa lagu soo dhowaynayaa waxaana lagu weydiisanayaa inaad buuxiso dhowr foom.
- Waxaa lagu tusi doonaa qolka bedelashada waxaana lagu weydiisan doonaa inaad iska bixiso rajabeetada aadna gashato ka korena gashato dharkaaga kore oo horay ka furan; goono la iska bixin karo ayaa lagu siinayaa haddii aad u baahan tahay mid.
- Sawir qaade dumar ah ayaa ku geyn doonta qolka x-ray-ga waxayna ku weydiin doontaa su'aallo. Ka dibna waxay naas walba ka qaadi doontaa laba raajo.
- Sawir qaadaha ayaa kuu sheegaya markaad baxayso.
- Sawirkaaga waxaa eegi doona laba dhakhtar oo si khaasa loo tababaray da'daal kasta ayaana la samayn doonaa si loo xaqiijiyo natiijadaada laba ilaa saddex asbuuc gudaheed.
- Mararka qaarkood dumar ayaa loo yeeraa si looga qaado X-ray siyaada ah. Haddii tani lama huraan tahay BreastScreen-ka WA ayaa ku soo wici doonta si arrinta lagaala hadlo.

## Xaggee ka helli karaa baarista raajada naaska?

BaaristaNaaska WA waxaa laga hellaa magaalaweynta, Gobolada iyo adeegyada baarista guurguura.

Si aad u hesho goobta kuugu dhow booqo:

www.breastscreen.health.wa.gov.au/Breast-screening/Breast-screening-locations

- Afar adeeg oo guurguura ayaa booqda meelaha baadiyaha ah labadii sanaba hal mar. Waqtiga ay u badan tahay inay yimaadaan booqo: www.breastscreen.health.wa.gov.au/Breast-screening/Rural-and-remote-women
- Ballamaha habeenkii iyo Sabtida waxaa laga hellaa rugaha caafimaadka badankood.
- Waxaa la helli karaa tas-hiilaadka Wheelchair-ka dhamaan adeegyada Baarista Naaska ee WA.
- Waxaa la helli karaa mutarjum lacag la'aana.

## Sidee ballan u samaysan karaa?

Haddii aad u baahan tahay caawimada mutarjumka, fadlan wac Adeega Tarjumida qoraalka iyo Afcelinta (TIS) ugu horayn **13 14 50** weydiina inay kugu xiraan BaarisNaaska WA Adeegeeda Dhexe oo ah **13 20 50.**

Ama wac **13 20 50** baarista raajada naaska oo LACAG LA'AAN adoo ku wacaya (qiimaha meeshaad joogto).

**Ballamada Online-ka ah waa la helli karaa** ballamada caadiga ah ee dhamaan Baarista-Naaska rugaha caafimaadka WA

**www.breastscreen.health.wa.gov.au**

## Koox u samaysiga ballanta

Ballan samaysiga Kooxda waxaa helli kara dumarka doonaya inay u yimaadaan koox ahaan. Waxweydiin intaas ka badan oo ku saabsan ballamada kooxda fadlan wac **13 20 50**.

## Agabyada lagu helli karo luqadaha kale

BaaristaNaaska WA waxay leeyihiin macluumaad luqada kale ah. Si aad u aragto wixii la helli:
www.breastscreen.health.wa.gov.au/Breast-screening/Multicultural-women

## Maxaa kale oo aan samayn karaa?

Xataa haddii aad leedahay raajada naaska ee BaaristaNaaska WA waxay ku dhiirigelinaysaa dhamaan dumarka in ay la socdaan naaska.

Inaad la socoto naaska macneheedu wuxuu noqonayaa inaad ogaato sida naaskaagu u egyahay aadna dareemayso waqtiyo kala duwan. Isbedela badan oo naasaha ayaa ah caadi waxaana keena isbedelada hoormoonka iyo da'da. Waa muhiim inaad ogaato muuqaalka caadiga ah iyo dareenka naasahaaga, si aad u garato isbedel kasta oo cusub. Naasahaaga ka fiiri muraayada mar mar.

Isbedelka lala soconayo waxaa ka mid ah:

- Buruq cusub, buruq ama naaska oo soo buuranaya ama agagaarka kilkisha;
- Isbedel kasta oo ku dhaca naaska ibtiisa sida wax wax ka imanaya, isbedel, nabaro ama cuncun;
- Isbedel kasta oo ku yimaada inta uu le'eg yahay, qaabka ama midabka ibta naaska;
- Isbedel kasta oo ku yimaada maqaarka sida diisnaan, guduud ama furuuruc; ama
- Wax kasta oo cusub, aan caadi ahayn ama xanuun soo noqnoqonaya.

**Haddii aad ogaato mid ka ka mid ah kuwaan oo naaskaaga ka muuqda arag dhakhtarkaaga.**





Waa muhiim inaad hubiso dhamaan hilibka kore ee naaska laga soo bilaabo kalxanta ilaa meesha ay marto rajabeetadu iyo agagaaraha kilkilada.

Government of Western Australia
North Metropolitan Health Service

BreastScreen WA
WA's only accredited screening service

BreastScreen AUSTRALIA
A joint Australian, State and Territory Government Program

**BreastScreen WA**
Telefoon (08) 9323 6700 Facsimile (08) 9323 6799 Email breastscreenwa@health.wa.gov.au
**Bookings 13 20 50**
Adeega Gudbinta Qaranka www.relayservice.gov.au Adeega Tarjumida iyo Afcelinta (TIS) 13 14 50

HP000373 OCTOBER 2019

**www.breastscreen.health.wa.gov.au**